

ISKU DIYAARINTAYDA BAARITAANKA TUUBADA GUDAHA JIRKA (ENDOSCOPIC ULTRASOUND, EUS) EE QAYBTA KORE

Muhiim, fadlan dib u eeg qaybtan haddii aad qaadato dawo loo yaqaan Harmuunga galaguunka-1 (Glucagon-Like Peptide 1, GLP-1) agonist (sida Ozempic, Weygovy, Trulicity, Rybelsus, Saxenda, Byetta ama kuwa kale) ama Borotiinka gubdiya sodium-glucose-ka-2 (Sodium-Glucose Transport Protein 2, SGLT-2) Ka hortagayaasha (Invokana, Farxiga, Jardiance, Steglatro) oo loo isticmaalo dhimista cayilka ama macaanka.

Haddii aad qaadato daawooyinkan, markaa waa inaad dawada u joojisa sida waafaqsan tilmaamaha soo socda:

GLP-1 Agonists (Ozempic, Weygovy, Trulicity, Rybelsus, Saxenda, Byetta ama kuwa kale):

- Hal ama laba jeer maalintiiba irbado la isku duro (tusaale Byetta, Victoza, Saxenda), jooji maalinta ka horeysa iyo maalinta ka dambeysa qaliinka.
- Hal mar irbado toddobaadle ah (tusaale: Trulicity, Ozempic, Weygovy, Bydureon, Mounjaro), haki 7 maalmood ka hor qaliinka.
- Afka laga qaato, maalinlaha ah (tusaale: Rybelsus), haki 7 maalmood ka hor qaliinka.

SGLT-2 Ka hortagayaasha (Invokana, Farxiga, Jardiance, Steglatro): Haki 4 maalmood ka hor qaliinka

Haddii aad u qaadato daawooyinkan sonkorowga, markaa waxaad u baahan tahay inaad la xiriirto kooxdaada daryeelka aasaasiga ah ama dhakhtarka endocrinologist (dhaqtarka ku taqsuuse xanuunada hormuunka) si aad u hesho tilmaamaha maareynta gulukoosta.

Haddii aad leedahay barista tuubada hunguriga (Esophagogastroduodenoscop, EGD) (Upper endoscopy) oo aad qaadato daawooyinkan, markaa waa inaad bilowdo cunto dareere ah oo cad **24 saacadood** ka hor qaliinkaaga. Tani way ka duwanaa doontaa tilmaamahaaga sheegaya inaad bilowdo cunto dareere saafi ah 11:45 galabnimo habeen ka hor. Tusaale ahaan, haddii qaliinkaagu uu yahay 8:00 AM, markaas waa inaad bilowdaa cunto dareere ah oo saafi ah 8:00 subaxnimo maalin ka hor. Hubi inaad raacdo tilmaamaha Wax aanan afka laga qaadaneynin (Nothing by Mouth, NPO) (wax afka laga qaadanayo majiraan ka hor 3 saacadood qaliinkaaga). Hakinta daawooyinkan iyo ka joogista dareeraha saafiga ah ayaa muhiim noogu ah in aan si badbaado leh u dhamaystirno qaliinkaaga.

Jooji ama Dib U dhig Balantadaada:

Haddii aad isku aragto COVID-19, oo uu ku gaadho noqoto COVID-19 ama aad qabto COVID-19 calaamado u eg waqti kasta ka dib marka aad ballanta sameysid, fadlan wac xafiiskeena si aad u go'aamiso haddii ay caadi tahay in la sii wado booqashadaada. Tilmaamaha COVID-19 ee xarumaha daryeelka caafimaadka ayaa ka duwanaa kara tilmaamaha la siiyo bulsho waynta. Intaa waxaa dheer, Haddii aad leedahay astaamo u eg hargab (sida qandho, qufac, neefta oo kugu yaraata) 14 maalmood gudahooda ee ballantaada, fadlan wac si aad dib u badasho ballanta. Haddii aad leedahay xaalad caafimaad oo dhowaan lagaa helay (sida diverticulitis dhibaatooyinka wadnaha, dhibaatooyinka neefsashada), fadlan wac xafiiskeena. Haddii aad u baahan tahay inaad baajiso ama dib u dhigto sabab kale owgeed, wac 612-871-1145 ugu yaraan 72 saacadood ka hor ballantaada.

Gaadiidka:

Waa qasab inaad diyaarsato qof masuul ah oo ku kaxeeya kadib baaritaankaaga. Taksi inuu ku qaado maaha dookh furan ilaa inuu kula socdo maahee qof masuul ah. Haddii aadan diyaarsan qof masuul ah, baaritaankaaga ayaa la joojin karaa dibna loo dhigi karaa. Ayadoo ku xiran faafitaanka COVID-19, darawalkaaga ayaa awoodi kara ama aan awoodi karin inuu kuu yimaado kahor iyo kadib baaritaanka.

1 maalin ka hor baaritaankaaga:

- Jooji cunista cuntooyinka adag oo bilow sacadu markey tahay **11:45pm** cunto dareere saafi ah. Dareeraha saafiga ah waxaa ka mid ah waxyaabo aad ka dhex arki karto.
 - Tusaalooyinka cuntada dareeraha saafiga ah waxaa ka mid ah: biyo, maraq cad ama maraq khafiif ah (doorashooyinka xorta ah ee gluten ee la heli karo), Gatorade, Pedialyte ama Powerade, cabitaannada fudud ee kaarboon ku jira iyo kuwa aan kaarboonaysnayn (Sprite, 7-Up, Gingerale), casiirka khudradda miiran ee aan saxarka lahayn (tufaax, canab cad, karanberry cad), Jell-O, popsicles, iyo ilaa hal koob oo qaxwo madow ama shaah ah (caano ama kareem aan lahayn) maalin kasta.
 - Waxyaabaha soo socda lama ogola in lagu daro cuntada dareeraha keliga ah: cabitaannada casaanka ah, cabitaannada khamriga, caanaha, isku darka barootiinka, maraxa kareenka ah, cabitaanka liinta, waxyaabaha ay ku jirto saliida iyo ruugista tubaakada.
 - Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan raacitaanka cunto dareere ah oo saafiya, fadlan eeg <https://www.mngi.com/conditions/clear-liquid-diet>

Maalinta baaritaankaaga::

Daawooyinka Subaxdii: Waxaad qaadan kartaa dhammaan daawooyinkaaga subixii ayna ku jiraan daawooyinka dhiigkarka, daawada dhiiga qafiifisa (haddii uusan xafiiskeenu kugu amrin joojin daawooyinka), methadone, daawada kahortaga qalalka adoo ku laqaaya kabooyin biyo ah **3 saacadood kahor baaritaankaaga** ama kahor. Ha cunin wax feetamiino ama kaabid ah oo la ruugi karo. Si looga fogaado in la joojiyo, ha isticmaalin xashiishka/Maadada ku jirta xashiishka (Tetrahydrocannabinol, THC) maalinta ka horeysa qaliinkaaga. Haddii aad qabto sonkorow, la xariir qofka kormeerka kugu wada si aad u hesho tilmaamo dheeri ah oo ku saabsan insulin iyo/ama maaraynta sonkorta dhiiga.

Sii wad Cuntada Dareeraha saafiga ah.

Xusuusin ahaan, sii wad inaad iska ilaaliso cabitaannada guduudan, cabitaannada khamriga ah, waxyaabaha caanaha laga sameeyo, ruxiitanka borotiinka, maraqa labeenta leh, casiirka, waxyaabaha saliidda ku jirto, tubaakada la calaaliyo iyo daroogooyinka sharci darrada ah. Adeegsiga maadooyinkaan ayaa keenaysa in baaritaankaaga la baajiyo.

- **6 saacadood ka hor baaritaankaaga:**
 - JOOJI isticmaalka dhammaan adkaha iyo dareeraha.
 - Waxba afka haka qaadan muddada waqtigan.

Hore ugu soo qaado waxyaalahan soo socda xiliga baaritaankaaga:

- Kaarka Caymiska / Sawirka AQOONSIGA
- Liiska Daawooyinka Hadda oo ay ku jiraan dawooyinka aan farmashiyaha laga qorin iyo kaabista
- Keen daawada neefsashada haddii aad hadda isticmaasho mid si aad u xakamayso neefta
- Keen muraayadaha indhaha maadaama lagu waydiin doono inaad iska saarto muraayadaha indhaha ka hor inta aan baaritaankaaga bilaaban

QORIDDA BAARITAANKA TUUBADA GUDAHA JIRKA

Waa maxay baarida tuubada gudaha jirka (EUS)?

Baarida tuubada gudaha jirka (endoscopic ultrasound, EUS) waxay ku siinaysaa sawiro faahfaahsan oo ku saabsan anatomiga mareenka dheefshiidka kaas oo ay ku jiraan mareenka caloosha ee sare ama hoose (gastrointestinal, GI). Mareenka sare waa hunguriga, caloosha iyo duodenum-ka; mareenka hoose waa mindhicirka iyo malawadka.

EUS waxa kale oo loo isticmaalaa in lagu ogaado xubnaha gudaha ee xiga mareenka caloosha iyo mindhicirka, sida kaadihaysta iyo xameetida. EUS waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo in lagu baaro sababta keenta xaaladaha sida calool xanuun ama miisaan dhimista aan caadiga ahayn. EUS sidoo kale waxaa loo isticmaalaa in lagu qiimeeyo cillad aan caadiga ahayn, sida kobcin, kaas oo lagu ogaaday baaritaanka hore ama raajo. Intaa waxaa dheer, EUS waxaa loo isticmaali karaa in lagu ogaado cudurrada xameetida, xuubka xameetida iyo kaadiheysta marka baaritaannada kale ay yihiin kuwo aan la isku raacsaneyn.

Dhakhtarkaagu wuxuu adeegsan doonaa tuubbo khafiif ah, dabacsan oo loo yaqaan 'endoscope' oo isagu ama iyadu ay ku dhex mari doonaan afkaaga ama futada aagga si loo baaro. Dhakhtarkaaga ayaa markaa daari doona qaybta ultrasound-ka si uu u soo saaro mowjado dhawaaq ah oo abuura muuqaalo oo ku saabsan habka dheefshiidka.

Maxaan filan karaa muddada ay socoto EUS?

EUS ee mareenka GI-ga sare, waxaa lagu siin doonaa daawo bilawga baaritaanka si ay kaaga caawiso inaad nasato oo aad u yarayso raaxo darida ama gocashada. Daawadan waxay kaa dhigi doontaa mid luloonaya.

Baaritaanka dhabta ah wuxuu guud ahaan qaataa inta u dhaxaysa 30-60 daqiiqo. Bukaana badankoodu waxay u arkaan inay tahay wax yar oo aan dhib lahayn waxaana laga yaabaa inay seexdaan muddada ay socoto. Haddii la helo unug jiran, dhakhtarku waxa laga yaabaa inuu ku soo saaro endoscope-ka si loo baaro si dhow amagoynta nud jidhka ah.

Waa maxay dhibaatooyinka suurtagalka ah ee EUS?

Inkasta oo dhibaatooyinka halista ah ee ka imanaya EUS ay naadir yihiin, nidaam kasta oo caafimaad ayaa leh suurtagalnimada khataro. Khatarta ka imanaysa EUS waxaa ka mid ah daloolin, ama jeexanin, dahaarka caloosha ama hunguriga, dhiigbax ka yimaada goobta jarista nudda jidhka, falcelinta daawooyinka, dhibaatooyinka wadnaha iyo sambabada, iyo dhaawacida ilkaha ama indhaha. Khatarta dhibaatooyinka ayaa yara kordha haddii irbad si qoto dheer loo gesho muddada uu socdo baaritaanka EUS. Waxa kale oo jirta khatar yar oo ah caabuqa haddii dareeraha laga saaro feex kasta, waxaana laga yaabaa in qalajiyaal la siiyo si taas looga hortago.